

Shattiyada Seattle

-qeyb ka mid ah taxanaha waaxyada-badan ee ku qoran adeegyada Magaalada iyo shattiyada

Qaadashada Oggolaansho

Waxaa la cusboonaysiiyay Oktoobar 2021

Miyaan u baahan nahay oggolaansho?

Shaqooyinka iyo nashaadaadka qaarkood, ayna ku jiraan kaydka iyo/ama adeegsiga agabka khatarta ah, ayaa u baahan oggolaansho lagasoo qaato Seattle Fire Department marka shaqooyinkaas iyo naashaadkaas lagu fulinaayo gudaha Seattle.

Noocyada Oggolaanshaha

Oggolaanshiyaasha ku meel gaarka ah ayaa la siiyaa nashaadaadka iyo shaqooyinka la fuliyo muddo gaaban. Kuwaan waxaa ku jira naashaadaadka sida teendhooyinka la buuffiyo iyo kuwa la tiirarka lagu dhiso, cunto bixinta, tartanada iyo xafladaha, bandhigyada ganacsiga iyo bandhigyada, shaqada dabka lagu qabto ee maraakiibta badda, Ruqsada saqafka, iyo shaqooyinka gioobaha dhismuhu ayaa la bixiyaa mudu aan ka badnayn lix bilood.

Oggolaanshaha shaqada ee sanadlaha ah ayaa la siiyaa goobaha la iskugu yimaado (kaniisadaha, maqaayadaha, xarumaha munaasabadaha) iyo shaqooyinka ama nashaadaadka khatarta ah ee loo sameeyo sida joogtada ah oo lagu qabto midkood meel gaar ah oo cayiman ama meelo kaladuwan oo daafaha magaalada ah.

Si aad u go'aansato inaad u baahan tahay oggolaansho aad ka hesho SFD iyo in kale, arag liiska nashaadaadka/agabka u baahan oggolaanshaha: <https://www.seattle.gov/Documents/Departments/Fire/Business/ActivitiesRequiringaSFDPermit.pdf>.

Maxaan u baahanahay si aan u codsado Oggolaansho?

Waxaad u baahan doontaa xog ku saabsan nashaadaadka, shaqooyinka ama agabka ayna ku jiraan, haddii ay jiraan, qariiradaha ama qorshayaasha goobta. Oggolaanshiyaasha agabka khatarta ah qaarkiis

waxaad u baahan kartaa inaad keento Cadaynta Dhaqan Galinta Agabka Khatarta ah (HMIS) kaasoo ay ku qoran yihiin liiska cadadka guud, maadooyinka uu ka kooban yahay, qaybaha khatarta ah iyo nambarka Adeegga Kala Miirida Miiqidada (CAS). Soo degso foomka HMIS iyo tusmada isticmaalaha ood ka helayso:

<http://www.seattle.gov/fire/business-services/permits#hazardousmaterial>.

Sidee ayaan Ku codsanayaa Oggolaansho?

Waa in la bixiyaa kharashka wakhtiga arjiga. [Soo dejiso foomamka arjiga](#) oo iimeel ugu dir permits@seattle.gov oo ku bixi [onleyn ahaan kaadhkaaga daynta](#). Ama buuxi arjiyada uu la socdo eegitaankaaga aad samaysan oo u dir "Magaalada Seattle" cinwaankeeda:

Seattle Fire Department Fire Prevention Division - Permits
220 Third Avenue South, 2nd Floor
Seattle, WA 98104-2608

Sidee ayaan U mudaysanayaa Kormeer?

Oggolaanshiyaasha ku meel gaarka ah ee hawlaha sunta ah ama kaydinta iyo adeegsiga agabka khatarta ah ayaa u baahan kormeer ay samayso SFD kahor intaan bilaabin shaqada lagu ogolaaday. Tusaale, alxanka iyo shaqada dabka ee lagu qabto doomaha ayaa u baahan kormeer intaan la bilaabin shaqada la ogolaaday. Haddii ay jirto, foomka codsiga oggolaanshaha ayaa kuu sheegaaya inaad codsato kormeer kahor intaan la bilaabin shaqada. Fadlan nalasoo xariir ugu yaraan hal maalin kahor si aan kuugu mudayno kormeerka—iimeel noogusoo dir permits@seattle.gov ama nagasoo wac (206) 386-1450, Isniinta ilaa Jimcada, 8 a.m. ilaa 4:30 p.m.

Dhammaan oggolaanshiyaasha kale oo dhan, uma baahnid inaad wacdo SFD si laguugu sameeyo kormeer — tan waxaa ku jira oggolaanshiyaasha agabka/shaqooyinka khatarta ah ee sanadlaha ah,

www.seattle.gov/fire

Fire Prevention Division
220 3rd Avenue South

Seattle.gov/fire/business-services/email-fire-prevention



City of Seattle
Fire Department

ogolaanshiyaasha munaasabadaha qaaska ah, iyo ogolaanshiyaasha sanadlaha ah ee goobta dadku iskugu yimaadaan. Taas badalkeed, kormeerayaasheena ayaa ama kusoo wacaaya si loo mudeeyo xili ay kugula kulmaan goobtaada, ama waxaan samayn karnaa kormeer aan lasii shaacin kahor intaan ogolaanshiyaha lagu siin ama kadib marka ogolaanshaha la bixiyo si loo xaqiijiyo inaad buuxinayso shuruudaha ogolaanshuhu kaa rabo. Ogolaanshiyaasha waqtiga cayiman leh (sida munaasabadaha qaaska ah ee dhici doona mustaqbalka dhaw ama ogolaanshaha rakibaada ee la xariira mashruuca dhismaha) ayaa la siinayaa muhiimada halka noocyada kale ee codsiyada ogolaanshaha caadiyan lagu kormeero qaabka lagu helay.

Kadib markaad gudbisno codsiyada iyo qarashka, waxaan ku siin doonaa risiid. Haddii aad codsatay ogolaansho sanadle ah, waa inaad kusoo dhajisaa risiidka goobta shaqada ilaa kormeerka laga samaynaayo aana kasoo saarayo ogolaanshahaaga. Marka aad hesho ogolaansho, fadlan iska fuji risiidka kadibna soo dhaji ogolaanshaha iyo shuruudihisa. Cidda masuulka ka ah ogolaanshaha ayaa laga doonayaa inay xaqiijiso in shuruudaha ogolaanshaha la raaco.

Sidee ayaan Ugu Diyaar Garoobi Karaa Kormeerka?

Kahor intaan SFD samayn kormeerka, dhammaan qalabka waa in la rakibaa goobta shaqadana waa in loo diyaarshaa shaqada. Kahor intaan lasoo saarin ogolaanshaha, kormeeraha SFD ayaa xaqiijin doona in dhammaan shuruudaha ay buuxisay goobtu kadibna go'aaminaaya haddii shuruudo dheeraad ah ama qaas ah loo baahan yahay.

Si kastoo tahayba, waa laguu sheegi doonaa si qoraal ah shuruudo kasta oo muhiim ah kahor intaan la ansixin ogolaanshaha codsiyada.

Goorma ayaan helayaa Ogolaanshahayga?

Ogolaanshiyaasha ku meel gaarka ah ayaa la saxiixi doonaa kadibna lagu siin doonaa waqtiga kormeerka. Ogolaanshaha sanadlaha ah ayaa laga shaqayn doonaa, la qori doonaa kadibna boostada ayay kuugusoo dirayaan Shaqaalaha Waaxda Ruqsadaha.

Heerka ogolaanshaha ama codsiyada ayaa laga fiirin karaa oonleanka: www2.seattle.gov/fire/permitStatus/.

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo

Fadlan fiiri su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo e la soo aruushay ee macaamiisheena ood ka helayso barta oonleanka ah: <http://www.seattle.gov/fire/business-services/permits>. Waxaad sidoo kale iimeel noogusoo diri kartaa ciwaanka permits@seattle.gov.

Haddii aad wali su'aalo ka qabto hanaanka kormeerka ogolaansho bixinta, waxaad iimeel u diri kartaa Qaybta Agabka Khatarta Gaarka ah leh SFD_FMO_SpecialHazards@seattle.gov ama qaybta Munaasabadaha Qaaska ah oo aad kala xariirayso SFD_FMO_SpecialEvents@seattle.gov.